
Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda



# Hababka Baahint Maamulka Soomaaliya

Afyare Cabdi Cilmi

Waxaa faafiyey Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2014
Waddada Amira Hotel, KM5, Degmada Hodan, Muqdisho, Soomaaliya

**About the Author**
Dr. Afyare Cabdi Cilmi waa aqoonyahan ku takhasusay culuumta siyaasadda, bare-na ka ah Jaamacadda Qatar, qaybteeda arrimaha caalamiga ah. Wuxuu qoray buug la magac baxay: "Understanding the Somalia conflagration: Identity, political Islam and peacebuilding."

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda**
Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Rights: Copyright © Machadka Heritage ee Daraasaadka

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karo www.creativecommons.org/licences/by/nc-nd/3.0.

Kala soo bax qoraalka bogga: www.heritageinstitute.org

## Contents


Hordhac 1

Habka Cilmi-Baarista Loo Sameeyey 1

Sababaha ka Danbeeya Rabitaanka Baahinta Xukunka 2

Sababaha Soomaali Badan u Doonayso Baahinta Xukunka 2

Awoodaha Dibadda ee Riixaya Baahinta Xukunka 3

Hababka Xukunka loo Baahin Karo 4

Hannaanka Kon-federaalka (Confederalism) 4

Federaalka 6

Hannaanka Awood-Qeybsiga (Consociationalism) 7

Hannaanka Baahinta Xukunka (Devolution) 7

Gunaanad 9

References 11

## Hordhac

Tobankii sano ee la soo dhaafay, dadka Soomaaliyeed waxay si weyn uga doodayeen arrinta la xiriirta in xukunka lagu baahiyo gobollada iyo degmooyinka . Kadib dumistii xukunkii keli-taliska ee milateriga ahaa, ma muuqato Soomaali badan oo si bareer ah ugu baaqaysa in dib loo soo celiyo dowlad dhexe oo keli-talis ah, awoodda dalkana ku haysata Muqdisho. Laakiin waxaa jira dad badan oo Soomaaliyeed oo doonaya in la helo dowlad dhexe oo xoog leh oo dimoqraaddi ah. Haddii si kale loo dhigo waxaa la dhihi karaa Soomaali badan ayaa u aragta lagama maarmaan in gobollada iyo degmooyinku ay xukunka la wadaagaan dowladda dhexe. Ha yeeshee, waxaa dhab ah in dood weyn ay weli ka taagan tahay qaabka ugu mudan ee xukunka loogu baahin karo gobollada iyo degmooyinka.

Dastuurka qabyada ah ee Soomaaliya wuxuu ka qabaa dooddan mowqif cad oo ah in nidaamka federaalku yahay qaabka ugu habboon ee maamulka lagu wadaagi karo. Dastuurku waxa uu tibaaxaayaa: "Soomaaliya waa dowlad federal ah oo madax-bannaan, waana jamhuuriyad dimuqraadi ah oo ku dhisan hannaanka is-matalidda loo dhan yahay ee shacabka (inclusive representation), nidaamka xisbiyada iyo caddaalad bulsho" (Dastuurka qabyada ah, 2012). Sidoo kale, dastuurka qabyada ah wuxuu caddaynayaa in federaalku uu ka kooban yahay laba heer oo kala ah dowladda dhexe iyo dowladaha gobollada. Waxaana dowlad-goboleed noqon kara laba gobol iyo wixii ka badan – gobollada waxaa laga tixraacayaa 18-kii gobol ee dowladdii militariga ahayd ay ka tagtay (Dastuurka qabayda ah, 2012). Si kastaba ha ahaatee, dowladihii ku-meel-gaarku waa ay ku guul-darreysteen inay dalka ka hirgeliyaan nidaam federal ah. Welina waa socotaa dooddii ku saabsanayd habka ugu mudan ee xukunka lagu baahin karo ama lagu wadaagi karo.

Siyaasiyiinta Soomaaliyeed fikir midaysan iyo faham dhamaystiran kama heystaan mowduucan. Dad badan nidaamka federaalka waxay u arkaan in uu yahay hannaanka kaliya ee dowlad dhexe beddeli kara (unitarism). Weliba, Soomaali badan, iyaga oo maanka ku haya wixii la soo maray, ayaa xukunka dowlad dhexe uu ula mid yahay kan keli-taliska ah. Waana yar tahay hadal-haynta hababka kale oo xukun wadaagga ku saabsan.

Ujeeddada daraasaddani waa in doodda bulshada ka dhex socota ee ku saabsan arrimahan xasaasiga ah ay wax ku kordhiso. Si ay uga qeyb-qaadato ballaarinta fahamka dadweynaha, warbixintu waxay sharxaysaa dalabaadka shacabka Soomaaliyeed iyo weliba farsamooyinka kala duwan ee la adeegsan karo si maamulka loogu baahiyo gobollada iyo degmooyinka dalka. Qeybta hore ee daraasaddu waxay soo bandhigaysaa fikradaha kala duwan ee ay ku doodayaan xoogagga u ololaynaya in awoodda lagu baahiyo gobollada iyo degmooyinka. Dabadeed, warbixintu waxay sharrax gaaban ka bixinaysaa afar hab-maamul oo badanaa loo adeegsado arrimaha noocan ah: Hannaanka kon-federaalka (con-federalism); hannaanka federaalka (federalism); hannaanka awood-qeybsiga (consociation); iyo hannaanka ay dowladda dhexe xukunka ku baahiso (devolution). Afartan hab waxaa sanadkii 1995 warbixin dheer ku falanqeeyey cilmi-baaris ay samaysay jaamacadda London, ayna hoggaaminayeen I. M. Lewis iyo James Mayal. Markaa kaddib waxaa wax ka qoray dad badan oo aragti ka dhiibtay habka ku habboon Soomaalida.

## Habka Cilmi-Baarista Loo Sameeyey

Xogta lagu dul-dhisay cilmi baaristaan waxaa aan lix bilood ka ururinnay waraysi aannu ka qaadnay hoggaanka iyo aqoonyahanka Soomaalida, dad isku-dhafan oo aan ra'yi weydiinney. Sidoo kale, waxaan akhrinnay oo daraasaynnay dastuurrada Soomaalida iyo khudbooyinka madaxda iyo cilmi baarisyo fara-badan oo mowduucaan laga qoray. Aqoonyahanno isugu jira Soomaali iyo ajaanib ayaa ka dooday hannaanka maamul ee ugu habboon dalka. Warbaahin kala duwan oo isugu jira raadiye, taleefishin iyo shabakadaha internet-ka ayaa si joogto ah u soo gudbiya doodahaas. Waxaannu isticmaalnay khudbooyinka madaxda dowladda dhexe iyo kuwa dowlad goboleedyada, doodaha dhexmaray wax-garadka iyo siyaasiyiinta iyo qoraallo-cilmiyeed kala duwan. Ugu danbayntii, waxaan waraysi la yeelannay illaa afartan siyaasiyiin iyo waxgarad Soomaaliyeed oo ah dadka lugta ku leh arrinta baahinta xukunka.

Badankooduna waxay si firfircoon ugu hawlan yihiin sidii ay Soomaaliya ugu samayn lahaayeen maamul goboleedyo.

### Sababaha ka Danbeeya Rabitaanka Baahinta Xukunka

Dad badan oo Soomaaliyeed ayaa lama huraan u arka inay gobollada iyo degmooyinku xukunka la wadaagaan dowladda dhexe. Qeybta hore ee warbixintu waxay sharxaysaa sababaha ku keenaya dadka inay dalbaan xukun baahsan. Marka hore waxay warbixintu soo bandhigaysaa waxyaabaha dadka Soomaaliyeed ay doonayaan inay ku gaaraan baahinta xukunka. Islamarkaasna waxay warbixintu sharxi doontaa sababaha ay xoogagga dibadda ee aan Soomaalida ahayni u doonayaan in la baahiyo xukunka.

### Sababaha Soomaali Badan u Doonayso Baahinta Xukunka

Sida kor ku xusan, dad badan oo Soomaali ah baa u arka xal in la baahiyo xukunka. Arrinta ugu weyn ee dadkaas u daliishaadaan rabitaankooda waa kalsooni-xumo dhextaal siyaasiyiinta. Tobankii sano ee ugu horreysey ee qaranka Soomaaliyeed uu xor ahaa, siyaasadda dalka waxaa xuddun u ahayd magaalada Muqdisho. In kasta oo dalku dimuqraadi ahaa, qaybo badan oo bulshada kamid ah oo ku noolaa deegaannada ka baxsan Muqdisho waxay dareemeen in la dayacay, lagana sad-bursaday. Ciidamada Xoogga Dalka ayaa la wareegay xukunka 1969-kii. Runtiina, ciidanku wuxuu sad-bursigii jiray ku kordhiyey cadaadis iyo dulmiyo farabadan. Dhibaatooyinkii uu xukunkii militarigu geystay waxay keeneen inay abuurmaan jabhado doonaya inay xukunka ka tuuraan Madaxweyne Maxamed Siyaad Barre.

Jabhadahaas oo ahaa kuwo beelo ka soo jeeda, waxay ku guulaysteen in ay Madaxweyne Maxamed Siyaad eryaan. Ha yeeshee, waxaa dhexdooda ka qarxay dagaal qaraar iyagoo ku loollamaya hanashada siyaasadda dalka. Ugu danbeyntii, jabhadahaas wax ka dhashay dagaal-oogayaal sababay in shacab badan uu ka qaxo magaalooyinka waaweyn, dalka oo dhan. Gabood-falkii shacabka loo geystey ayaa waxay sii kobcisay kalsooni darradii u dhexeysay shakhsiyaadka, beelaha iyo jufooyinka. Cabsida laga qabo in ay soo baxdo dowlad dhexe oo xooggan oo ay hal beel ku amar-ku-taaglayso, inta badan waxay salka ku haysaa khibraddaas taariikheed ee ay bulshadu soo martay.

Labo, dadka Soomaaliyeed waxay doonayaan inay doortaan madaxdooda marka laga soo billaabo heer degmo illaa iyo heer qaran. Dowladihii hore ee dalka soo maray iyaga ayaa u soo magacaabi jiray guddoomiyayaal iyo mas'uuliyiinta kale gobollada iyo degmooyinka. Runtii, dhaqanka dowladdii militarigu wuxuu sii kordhiyey shaki ay dad badan ka qabaan dowlad dhexe. Sidaa darteed, waxaa muuqata in dad badan ay rabaan inay si dimoqraadi ah u doortaan wakiillada iyo madaxda matalaya heerarka kala duwan ee dowladda. Dadka hanka siyaasadeed leh, waxay farsamo yaqaanno ama xarfaan ku noqdeen inay ka faa'iideystaan dareenka ka jira deegaannada ee ah in ay helaan ka qaybgal iyo matalaad, iyaga oo markaas u istaaga hirgelinta deegaan-beeleedyo, inta aysan raadsan madaxweynenimo qaran.

Saddex, taariikh ahaan muwaadiniinta Soomaalida waxa khasab ku ahayd in ay Muqdisho u safraan si ay u helaan adeegyada aasaasiga ah, sida tacliin sare iyo baasaboorka. Baahida loo qabo in adeegyada dowladdu bixiso si dhib yar loo helo ayaa ah mid kamid ah sababaha ugu waaweyn ee loo cuskado in loo baahan yahay in awoodda xukunka ee Soomaaliya la baahiyo -- Iyada oo dooddu ay tahay muwaadinka Soomaaliga in lagu khasbo ma aha in uu safar dheer u galo si uu u helo adeeg aasaasi ah oo uu ka heli karo deegaankiisa. Isku daygii dowladdihii hore ay isku dayeen in ay xaddidaan helidda adeegyada aasaasiga ah (sida baasaboorka) ayaa muwaadiniin badan u arkaan markhaati muujinaya in dowladda dhexe ay doonayso inay iyada ku koobnaato awoodda dalka.

Ugu danbayn, eedaha ay gobolladu ka tirsanayaan Muqdisho ama dowladda dhexe badankoodu waa kuwo laga garaabi karo oo loo qaateen ah. Dowladaha Soomaaliya waxay si isku mid ah ahmiyadda koobaad u siiyeen horumarinta Muqdisho, iyaga oo dalka intiisa kale dayacay. Arrintaasi waa arrin Soomali badan weli ku weyn. Soomaaliya waa waddan leh khayraad kala duwan. Xeebta Soomaaliya oo ah midda Afrika ugu dheer waxaa ceegaaga khayraad badan. Xeebaha

waqooyi oo leh dekado dabiici ah waxay ku jeedaan marinnada adduunka ugu weyn ee gaadiidka badda. Dhul-beereedka koonfurta Soomaaliya waa meel leh fursad weyn oo wax-soosaar. Xoolaha nool, oo ay ku tiirsan yihiin 65% shacabka Soomaaliyeed, ayaa ah isha ugu badan ee lacagta adag laga helo, welina fursado koboc oo weyn ayaa ka jira. Haddaba, in si caddaalad ah loo wadaago kheyraadka waa qodob muhiim ka ah doodda socota oo ku saabsan baahinta xukunka. Haddii saliid qayriin oo beec geli karta dalka laga helo, waxay horseedi kartaa isku-dhac salka ku haya arrimo dhaqaale. Isku-dhac noocaas ahina saamayn weyn ayuu ku yeelan karaa dalabka ay Soomaalida qaar ka mid ah dalbanayaan in deegaannadu madax-bannaani helaan iyo doonitaanka qaar kale ay ku doonayaan jiritaanka dowlad dhexe oo awood leh.

In awoodda si buuxda loo baahiyo iyada oo ay muwaadiniintu si xor ah u dooranayaan wakiillada deegaanka iyo kuwa dowladda dhexe, waxay xal u noqon kartaa kalsooni darrada baahsan ee dowladda dhexe laga qabo. Sidoo kalana waxay daaweyn kartaa dalabka ka-qayb-galka siyaasadda, matalaadda iyo helitaanka adeegyada dowladda. In si siman ay dadka Soomaaliyeed u qeybsadaan khayraadka hodanka dalku ku yahay waxaa kale oo ay keeni kartaa in horumarka dhaqaalaha ee iman doona aanuu ku koobnaan caasimada oo keliya.

## Awoodaha Dibadda ee Riixaya Baahinta Xukunka

Ka sokow culaysyada gudaha ee dalbaya baahinta xukunka, quwado dibadda ah (sida dalalka deriska ah iyo bulshada caalamka) ayaa saamayn weyn ku leh go'aaminta hannaanka maamul ee Soomaaliya ku habboon.

Dalalka deriska, ah gaar ahaan Itoobiya iyo Kenya, waxay si toos ah saamayn ugu leeyihiin siyaasadda dalka iyo tan heer deegaan ee Soomaaliya. Istiraatijiyad ahaan, Itoobiya iyo Kenya waxay door bidayaan dawlad Soomaaliyeed oo tabar-yar, iyaga saaxiib la ah, iyagana ku tiirsan.

Kaddib markii ay Soomaaliya xorowday 1960-kii, madaxda Soomaaliyeed waxay u is-taageen in ay baadi goobaan Soomaali weyn, taas oo Kenya iyo Itoobiya ay ku tilmaameen dhul-ballaarsi ay dowladda Soomaaliya ku doonayso mideynta Soomaalida ku nool Geeska Afrika. Labadaas wadsan-ba welwel bay ka muujiyaan soo bixidda cudud doonaysa Soomaali weyn.

Itoobiya muddo dheer ayay Soomaaliya fara-gelinaysey. Ciidamada Itoobiya marar fara badan ayay Soomaaliya soo galeen illaa iyo intii ay duntay dowladdii Soomaaliya 1991-dii. Itoobiya waxay si bareer ah u taageeraysay labaatankii sano oo la soo dhaafay kooxo kala duwan oo Soomaaliya ka jiray. Itoobiya waxay ku duushay Soomaaliya sanadkii 2006-dii iyada oo haysata taageerada Maraykanka si ay cagta u mariso Midowga Maxkamadaha Islaamka, oo ahaa maamulkii ugu horreeyey ee Muqdisho xasiliya, illaa intii qaranku dumay 1991-dii.

Burburkii Midowga Maxkamadaha wuxuu si toos ah iyo si dadban-ba u keenay in si xawli ah ay u koraan xoogagga xag-jirka ah. Ururka al-Shabaab waxa uu deg-deg u qabsaday dhul ballaaran oo ka tirsan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Ciidanka Itoobiyana, tan iyo intii ay si rasmi ah ugu biireen AMISOM bishii January 2014, waxay ku sugnaayeen Soomaaliya, iyaga oo marna bixi jiray marna soo gali jiray. Sida ficilkooda ka muuqata, Itoobiya iyo Kenya waxay door-bidayaan in ay arrimaha Soomaaliya kala xaajoodaan dhowr maamul oo tabar-daran, intii ay la xaali lahayd dowlad dhexe oo xoog leh.

Dhawaan, Itoobiya waxa ay dhexdhexaadisay maamulka ku meel-gaarka ah ee Jubba iyo Dowladda Federaalka, waxayna shaacisay inay diyaar u tahay in ay dhex gasho Puntland iyo Dowladda Federaalka.

Kenya waa ay ku cusub tahay arrimaha Soomaaliya, waxa ayna markii ugu horreysey ciidan soo galisey Soomaaliya Oktoober 2011. Ciidanka Difaaca Kenya (CDK) waxay hormuud ka ahaayeen in al-Shabaab laga saaro dhowr magaalo oo Jubbooyinka kamid ah, ayna kamid tahay magaalada dekedda ah ee Kismaayo. Si rasmi ah ayaa Febraayo 2012 CDK loogu biiriyey ciidanka nabad ilaalinta Midowga Afrika ee AMISOM. Laakiin ciidanka Kenya waxa ay sii wateen qorshayaalkii ay gobolka ka lahaayeen, iyaga oo mararka qaarkoodna ku kacayey arrimo ka-hor-imaanaya waajibaadkii ay AMISOM ahaan u qaateen. Kenya si ay u ilaashato danaheeda, si bareer ah ayay u qiratay in ay taageersan tahay samaynta maamul goboleed koofurta

Soomaaliya ah oo ku teedssan soohdinta, ka xigsada cabsida ay qabto. Markii ay ka hawlgashay samaynta maamul hoosaadka gobollada Jubbuuyonka, Kenya waxay kala furfurtay qorshayaasha dowladda Soomaaliya.

Dhanka kalena deeq-bixiyayaashu waxay laftoodu muujiyeen inay danaynayaan in maamulka lagu baahiyo gobollada iyo degmooyinka dalka. Deeq-bixiyayaal badan ayaa si toos ah ula shaqeeyey maamullada gobollada iyo deegaannada dalka ka jira. Dowladda Maraykanka iyadu waaba ay sharciyaysay hab-dhaqankaan iyada oo u bixisay Siyaadada labada wadiiqo ee Soomaaliya (Dual Track Policy). Maaddaama aysan dowladda dhexe awood lahayn, waa la fahmi karaa in deeq-bixiyayaashu ay la macaamilaan ciddii ay talo ka go'do. Waxayna u cuskadaan aragtida leh 'waxaan samaynaynaa wixii suurta gal ah marxaladda la joogo."

La shaqaynta cid aan dowladda dhexe ahayn sida kooxo iyo maamullo deegaan, waxa ay deeq-bixiyayaasha fursad ballaaran u siisay inay gaaraan meelo badan oo Soomaaliya ka mid ah oo aanay dowladda Soomaaliya awood ku lahayn. Dhinaca kale, waxaa la oran karaa deeq-bixiyayaashu inay la shaqeeyaan maamullada gobollada waxay sharciyad siiyeen awoodda maamullada gobollada. Taasna waxaa ka dhashay inay wiiqanto dhisidda awoodda iyo sharciyadda dhowladda dhexe.

Bulshada caalamku waxay u aragtaa baahinta maamulka tiir ka mid ah dowlad-wanaagga. Sida ay tilmaantay Lidia Cabral "bulshada caalamka oo wax ku dul-dhisaysa fikradaha ah xoojin iyo beekhaaminta ayaa kaalin weyn ka ciyaaray dadaallada lagu doonayo in xukunka lagu baahiyo" (Cabral, 2011, p. 6). Yoolalka ah in nabaddana la dhiso dowladdana la dhiso - kuwaas oo kamid ah Qorshaha Hiigsiga Cusub (New Deal) ee Soomaaliya iyo deeq-bixiyayaalku ay ku heshiiyeen, gaar ahaan qaybtiisa siyaasad loo dhan yahay (inclusive politics), waxay xoojinaysaa baahida loo qabo wada-hadal maamullada gobollada iyo Dowladda Federaalka si ay isula meel dhigaan arrimo xaasaasi ah: dhaqaale wadaagga, maaraynta khayraadka dabiiciga ah, kaalinta, hawl-shaqeedka (functions) iyo xaduudaha maamullada kala duwan (siyaasadda xukun wadaagga), qaab-dhismeedka, masuuliyadaha iyo hawl-gallada unugyada hay'adaha amniga" (Federal Republic of Somalia, p. 5).

In awoodda maamulka Soomaaliya la baahiyo waxaa looga ololeeyey meelo ka baxsan xuduudaha Soomaaliya, sida dalalka deriska oo danahooda daba socda iyo deeq-bixiyayaasha oo danaynaya in ay dalka meel kasta ka gaaraan iyo iyaga oo suuq geynaya aragtiyadooda ah baahinta maamulku in uu qayb ka yahay dowlad-wanaagga.

## Hababka Xukunka loo Baahin Karo

Dhammaadkii dagaalkii qaboobaa kaddib (1990), dalal badan ayay dagaallo sokeeye ka dheceen. Dagaalladaas qaarkood waxay ku dhammaadeen in qolo adkaato sida Ruwaanda, Yugaandda iyo Itoobiya. Qaar kalana waxay ku dhammaadeen wadahadal heshiis keenay sida Koofur Afrika iyo Mozambiik. Sidii uu doono dagaal ha ku dhammaadee, madaxda waxaa mar kasta lasoo gudboonaanayey hawsha adag ee la xiriirta samaynta hay'ado maamul ama dowli ah oo dalkooda ku habboon oo maareeya khilaafyada siyaasaddeed, dhaqaale iyo dhaqan ee bulshooyinkooda ka dhex jira. Duruufaha Soomaaliduna kuwaas kama duwana.

Khubaro ay hoggaaminayeen Ioan Lewis iyo James Mayall ayaa sanadkii 1995-tii soo saaray qoraal-cilmiyeed ay u bixiyeen Cilmi-Baaris La xiriirta Qaab-dhismeedka Siyaasadda ee Baahinta Xukunka ee Soomaaliya (Lewis & Mayal, 1995). Qoraalka ayaa waxaa lagu sharxay afarta hab ee khuburada cilmiga siyaasaddu ay badanaa soo jeediyaan markii ay diyaarinayan qaab-dhismeedka maamul ee bulshooyinka qaybsan. Afartaas hannaan waxa ay kala yihiin: hannaanka kon-federaalka; hannaanka federaalka; hannaanka konsosiyashan iyo hannaanka baahinta xukunka ee aan kor ku sharaxnay. Qaybaha soo socda ee qoraalkan waxa uu si dulmar ah u eegi doonaa calaamadaha afartan qaab-dhisme iyo sida aqoonyahannada Soomaaliyeed iyo kuwa aan Soomaalida ahayn ay u doodeeen.

### Hannaanka Kon-federaalka (Confederalism)

Konfederaal waxaa lagu qeexaa heshiiska ay dowlado kala madax-bannaan ku galaan inay arrimaha qaar ay

ka midoobaan. Dowlado kala madax-banaan ayaa isu taga si ay u samaystaan siyaasado isku mid ah ama is-kaabaya (Elazar, 1991; Lister, 1996; Golove, 2003). Tusaalaha ugu fiican ee tusinaya Konfederaali waa Midowga Yurub. Dowladaha uu ka kooban yahay midowgaasi waxay haystaan madax-bannaanidoodii, laakiin waxay ka midoobeen arrimaha qaar sida siyaasadda ganacsiga, dhaqaalaha, socdaalka iyo difaaca. Waxa kale oo ay xaq u leeyihiin xubnaha midowga noocaan ah ku bahaysan in dowlad waliba ay diidmo qayaxan ka keeni karto wixii aan u cuntamin (Golove, 2003).

Xuseen Aadan (Xuseen Tanzania) oo qormo dheer qoray 1994-tii wuxuu tilmaamay in konfederaal uu yahay waddo loo mari karo in ay sii wada-joogaan Somaliland iyo Soomaaliya. Wuxuu yiri, "Waa suurtagal in duruufo hoose iyo kuwo caalami ah ay Jamhuuriyadda Somaliland ku khasbaan in ay dib-uga laabato madax-bannaanida buuxda, ayna oggolaato inay xiriir konfederaal ku salaysan ay la yeelato Muqdisho" (Adam, 1994, p. 121).

Lewis iyo Mayall waxa ay soo jeediyeen sanadkii 1995-tii in qaab-dhismeedka konfederaalka uu noqon karo xal, iyaga oo yiri:

Waayo-aragnimadii Yurub waa mid ay Soomaalidu wax ku qaadan karaan ama ka faa'iideysan karaan: waxyaabaha ugu weyn oo dhiirri-galinayey inay Yurub midowdo waxay ahayd in looga hortago ku noqoshada colaad la nooc ah labadii dagaal ee Yurub ee dunida dabka saaray. Haddaba, mustaqbalka, iyaga oo ka shidaal qaadanaya dhaqankooda siyaasadeed, waa suurtagal in gobollada kala duwan ee Soomaaliya ay samaystaan hay'ado iyo hab-dhaqan siyaasadeed (policy) oo ka dhexeeya. Soomaalidu markaas waxa ay ku wada shaqayn karaan madax gobol kasta dad uga jiro oo wakiil ka ah bulshada inteeda kale, halkaas oo uu gobol kasta ku ilaashanayo madax-bannaanidiisa iyo xaqa inuu ku isticmaali karo diidmada qayaxan ama inaanau qeyb ka noqon hindisayaasha aanu rabin (Lewis and Mayall, 1995, p. xix).

Richard Dowden, maqaal uu ku qoray wargeyska African Arguments, aragtida Lewis iyo Mayal ayuu ku raacay. Isaga oo Midowga Iswizerland u soo qaadanaya tusaale ay Soomaalidu ku dayan karto, waxa uu ku dooday inuu faa'iido la fahmi karo uu leeyahay qodobka u oggolaanaya dowladaha midoobey inay diidi karan ka qayb-qaadashada hawlaha qaar:

Sida dadku u nool yihiin loona maamulo (Iswizerland ahaan) waa mid deegaanku go'aansado. Konfederaalka macnaheedu Iswizerland waa in waaxyaha dalkaas u qaybsan yahay (cantons) ay dalka Iswizerland si xor ah ugu soo biireen ayna ka bixi karaan markii ay rabaan. Sidaas darteed waa in loo oggolaado dowladda Muqdisho in ay maamusho magaalada iyo dekedda iyo xitaa gobolka Benaadir, laakiin aan in ka badan loogu darin. Wadahadal waa inuu u billowdaa gobol-gobol, kaddib waa in laga hadlaa nooca uu noqonayo xiriirka gobollada iyo magaala madaxda, awooddana gacanta loo geliyaa dowladaha hoose, ee aan loo gelin midda qaranka (Dowden, 2011).

Roland Marchal iyo Ken Menkhaus, oo u jawaabaya maqaalka Dowden, iyagu waa ay ku khilaafeen. Marchal waxa uu tilmaamay in faafidda islaamiyiinta ee sagaashannaadkii iyo horraanta labada kun inay qayb ahaan tahay, "kacdoon waddani ah oo looga soo horjeedo waxa in badan oo Soomali ah ay u fasirteen jarjaridda (balkanization) Soomaaliya" (Marchall, 2011). "Waana in la joojiyaa in dib-u-dhiska qaranka loo arko mashruuc UNDP ama NGO ah". Isaga oo Marchal hadalkiisa sii watay waxa uu yiri, "waana in (dib-u-dhiska qaran) loo arkaa sida ay tahay oo ah arrin qarda-jeex ah, iska-hor-imaanaysa, inta badan la is-khasbayo, dhiig uu ku daato, socotana wakhti ka dheer hawlgal diblomaasiyadeedka iyo qandaraaska Qaramada midoobay." (Marchall, 2011).

Dhanka kale Menkhaus, wuxuu isagu walwal ka muujiyey faafidda gobollo-beeleedyo haddii Soomaaliya ay qaadato hannaanka konfederaalka. Isaga oo tusaale u soo qaatay Somaliland iyo Puntland, Menkhaus waxa uu yiri, "waxa ay muwaadinnimada dadka ku nool deegaanadooda ku qeexayaan mid qabyaaladaysan oo qabiilooyin gooni ah muwaadin u aragta, iyaga oo qabiilooyinka kale ula dhaqmaya, markii ay u roonaadaan, in ay yihiin marti (galti) markii ay u darnaadaanna ajaanib sharci darro ku jooga" (Menkhaus, 2011). Beelaha laga tirada badan yahay waxa ay khatar u sii yihiin in fursad la'aanta hadda haysata looga sii daro, oo gobollo beeleedyada hal qabiil ka amar ku taagleeyaan inay u dhaqmaan xukun maroorsiga iyo xaqsoor la'aanta dowladda dhexe lagu diidanaa ama lagu dhalliilayey.

Ma jiraan tusaalayaal lagu kalsoonaan karo oo muujinaya in hannaanka konfederaalka lagu xallin karo colaadaha sokeeye. Sanadkii 1982-dii waxaa

konfederaal samaystay Senegaal iyo Gaambiya kaasoo loo bixiyey Senegambia. Waxa uu dhex maray laba dowladood oo horay xor u kala ahaa, kaddibna waa lagu kala tagey 1989-kii. Gaambiya ayaa diidday in ay aqabasho wax ay u aragtay amar ku taaglaynta Senegal. Qaaradda Africa waddamada dhawaantan xorta noqday ee Eriteriya iyo Koofurta Suudaan – xiriirka ay la leeyihiin dowladihii ay horay uga tirsanaayeen waa mid khalkhal uu ku jiro..

## Federaalka

Marka macnihiisa guud la fiiriyo, nidaamka federaalku waa qaab lagu saleeyo habeynta siyaasadda dalka iyadoo loo qeybinayo awoodaha dastuuriga ah laba heer oo kala ah heer qaran iyo heer gobol (Wheare, 1964). Ronald L. Watts waxa uu isaguna ku qeexay macnaha federalka nidaam ay "bulsho hal dal ku nooli waxna ku wada-yeelanayaan, waxna ku kala yeelanayaan" Marka nidaamka federaalka laga hadlayo madax-bannaanidu (sovereignty) waxay u kala qeysban tahay dowladda dhex iyo kuwa gobollada. Mid walba waxay madax-bannaani buuxda u leedahay awoodaha uu dastuurku siinayo (Wheare, 1964; Watts, 1996). Tusaale ahaan, haddii dastuurku siiyo waxbarashada iyo caafimaadka dowladaha gobollada, iyagaa u xor ah, dowladda dhexena waa ay uga danbaynaysaa. Markii si kale loo dhigo, nidaamka federaalka ah waxaa uu siinayaa muwaadinka laba ama saddex dowladood oo mid waliba ay hawl dastuuri ah ku qeybsan tahay.

Peter H. Schuk wuxuu tilmaamay afar waddo oo kala duwan oo uu ku dhasho nidaamka federaalku. Kow, gobollo jiray ama dhulal la gumaysto oo isku tagey ayaa samaystay hal dal oo federaal ah (sida dalka Maraykanka). Labo, dalalka gumeystayaasha ahaa ayay mararka qaar dhacdaa inay ku khasbaan dalka ay gumaysanayaan nidaam feeraali ah, sida Boqortooyadii Ingriisku ay dalka Ostraaliya uga dhigtay federal. Saddex, waxaa iyaduna dhacda in waddamada dagaalka looga adkaaday qaarkood lagu khasabay nidaamka federal-ka, sida Jarmalka looga dhigay federaal kadib dagaalkii 2-aad ee dunida. Afar, dal jiray oo go'aansaday in uu qaato nidamka federaalka si uu u qanciyo qaybaha kala duwan ee bulshada, sida Koofur Afrika iyo Biljam (Schuk, 2006).

Sida ay tilmaamaan dadka aaminsan nidaamka federaalku wuxuu keenaa in gobol kasta oo xubin ka ahi uu difaac adag ka yeesho cadawga dibedda, gobol kastana waxa uu siinayaa fursad ganacsi oo balaaran iyo shaqaale badan. Muwaadiniinta dalalka federaalka ahi waxa ay helaan fursado badan oo ay siyaasadda dalka uga qayb qaataan oo ah doorashada heerarka kala duwan ee awoodaha haya. Dadka laga tirada badan yahay, haddii ay deegaan u gaara dalka u badan yihiin, feker ahaan, dhaqankooda iyo luuqaddooda ayey isku maamulaan iyaga oo aan cabsi ka qabin in ay doorriyaan ama kusoo butaacaan kuwa ka tirada badani (Schuk, 2006).

Dhanka Soomaaliya, Professor Maxamed Xaaji Mukhtaar waxa uu sheegay in Xisbigii Dastuur Mustaqbal ee Soomaaliya (HDMS) ee matalayey dadka taariikh ahaan laga sad-bursan jirey ee beelaha Digil iyo Mirifle, inuu ahaa xisbigii ugu horreeyey ee soo jeediya in la qaato nidaamka federaalka, intaanba xorriyadda la qaadan 1960-kii (Mukhtar, 1989). Soo jeedintaasi ma noqon mid la qaato maaddaama madaxda siyaasadda badankoodu ay danaynayeen hannaanka dowladda dhexe.

Tirada guud ee dowladaha xubnaha ka ah Qaramada Midoobay waxay kor u dhaaftay 200. Tiradaas waxaa nidaamka federaalka qaatary 25 dal oo kaliya. Dhanka qaaradda Afrika, waxaa federal sheegta saddex dowladood. Golaha dalalka federaalka ah (Forum of Federations) waxay sheegteen in dalalka federaalka ah ee dunida ay ku nool yihiin in ka badan 40% dadka adduunka (Forum of Federations, n. d.). Halkaa waxaa laga garan karaa in dalalka federaalka ah ay badankoodu yihiin dalal waaweyn oo dad badan. Mid kasta oo ka mid ah saddexda waddan ee Afrikaanka ah ee federaalka ah - Nayjeeriya, Itoobiya iyo Koonfurta Africa - waxay ka mid yihiin shanta waddan ee qaaradda ugu dadka badan. Dadka Soomaaliya oo qiyaas ahaan tiradoodu ay tahay10 milyan, way ka yar yihiin tirada dadka ku nool gobollo ka mid ah Koonfur Afrika, Nayjeeriya iyo Itoobiya.

Lewis iyo Mayall waxay iyagu arkaan in nidaamka federaalku uu noqon karo meel-dhexe oo ay isugu imaan karaan kooxaha doonaya dowlad dhexe iyo kuwo doonaya in la baahiyo xukunka (Lewis & Mayal,

1995). Nidaamka noocan ah, dowlad dhexe iyo maamul goboleedyadu way iska barbar jirayaan. Lewis iyo Mayal waxay sheegeen in Isutagga Imaaraadka Carabtu uu Soomaaliya tusaale wacan u noqon karo.

Maxamed Abshir Waldo oo ah qoraa ruug caddaa ah, waxa uu federaalka u arkaa daawo ku habboon in lagu xalliyo carqaladaha siyaasadeed ee Soomaaliya ka jira. Qoraal uu ka qoray dhalashadii Puntland, Waldo waxa uu tilmaamay:

> Go'aanka ah in federaal la qaato waxa lagu dul dhisay saddex arrimood: 1) In nidaamka maamul goboleedyadu uu yahay midka ugu habboon marka la eego xaaladda lagu jirey ee lagu daweyn karo, loogana gudbi karo, cabsida, cadaawadda iyo kalsooni xumada ka dhashay dagaalkii sokeeye ee dhiiga lagu qubay; 2) In federaalku uu yahay xal u dhexeeya nidaamyada kala ah hannaanka maamul ee ku saleysan awood-maroorsi, xarun keliya ka go'ada iyo tan goosashada mutaxan; 3) xukun wadaaggu wuxuu xoojinayaa, awoodna siinayaa degmooyinka iyo gobollada, isla markaana wuuu keenayaa horumar bulsho iyo dhaqaale oo isku dheelli tiran, wax-soo saarna leh (Waldo, 2010).

Dhanka kale, Dr. Cali Cabdbdiraxman Xirsi oo arrintaan wax ka qoray 2004-tii waxa uu bidhaamiyey dhowr sababood oo muujinaya in federaalku aanu Soomaaliya xal u ahayn:

> …Soomaaliya ma aha dal dadyow kala dhaqan ah ay ku nool yihiin, ayna ka jiraan is-diidmo daran oo dhaqan ama diimeed; mana aha deegaan ay ku nool yihiin qoomiyado aad u kala tagsan kuwaas oo baahi weyn u qaba in ay ka soocnaadaan qoomiyadaha kale, sidaas darteedna u baahan damaanad-qaad dastuuri ah oo u sugaysa sidii dad ku nool dal dhaqanno badan leh ay ku noolaadaan iyaga oo tooda aan laga fara-gelin. Ma jirto meel dalka kamid ah oo u istaagi karta in ay tahay unug federaali ah oo isku filan. Waxa kaliya ee ay u badan tahay in ay dhacaan, haddii la hirgeliyo qorshaha dalka ka dhigaya federaal, waa burburka dalku uu u qaybsamo dhowr deegaan-beeleed, dhaqaale ahaan aan is-bixin karin, dadkiisuna yihiin sooc; waxa kaliya ee ay soo kordhiyaan abuurida deegaan beeleedyo sida muuqata sii hurin kara cadaawadfii beeleed ee dagaalka sokeeye laga dhaxlay. Markii deegaanno qabaa'il la sameeyo waxaa hakad iyo dib-u-dhac ku imaanayaa midnimadii qaran iyo isku-milankii bulshada, waxayna noqonaysaa daruur mugdi ah oo ka dul curata Soomaalinimada, oo haddii xaalku sidaan sii ahaado, la hubo in ay dabaysha raaci doonto. Sidaas darteedna federaalku ma aha nidaam ku habbboon Soomaaliya (Xirsi, 2004).

Sida ku cad dastuurkii hore ee xilligii kul-meel-gaarka iyo dastuurka qabyada ah, Soomaaliya waxay sharci ahaan ahayd waddan federaal ah ilaa 2004-tii. Dowladihii ku meel gaarka ahaa ee ka horreeyey dowladdan Federaalka ee Soomaaliya oo ay hawshooda wadeen laba madaxweyne (Cabdullaahi Yuusuf iyo Shariif Sheekh Axmed) iyo shan Ra'iisul Wasaare (Cali M. Geeddi, Nuur Xasan Xuseen (Nuur Cadde) Cumar C/rashiid, Maxamed Cabdullahi 'Faramaajo' iyo C/weli M. Cali-gaas), dhammaantood, way ku guul darraysteen in ay hirgeliyaan nidaamka federaalka.

## Hannaanka Awood-Qeybsiga (Consociationalism)

Qodobka ugu muhiimsan ee hannaankan ka soocaya labada hab ee konfederaal-ka iyo federaalka waa inuusan ku dhisnayn gobollo ama dhul. Dunida waxaa ka jira dalal ay dadku iyagoo kala diin ah ama kala luqad ah ay haddana is-dhex deggen yihiin. Marka aysan dadku dhul soohdintiisa la yaqaan aysan u qeybsanayn waxaa la adeegsadaa hannaanka awood-qeybsiga. Dalka Lubnaan ayaa tusaale ka ah dalalka nidaamkan isticmaala. Hannaankani waxa uu leeyahay taariikh dheer laakiin waxaa isticmaalka ereyga caan-bixiyey Arend Lijphart. Hannaankan waxaa kaloo lagu magacaabaa hannaanka aan sida loo kala badan yahay la isku xukumin (non-majoritarian) ama dimuqraadiyad ku dhisan wixii la isla ogol yahay (cosensus democracy). Taas oo macnaheedo yahay, in dastuurka lagu caddaynayo in koox sida qoomiyad ah, ama dad isku diin ah, ama dad luuqad wadaag ah, ama sida Soomaaliya hal beel wada ah, ay hoggaan metela leeyihiin. Hannaankani waxa uu ka billowdaa heshiisyo awood-qaybsi iyo sameynta gaashaan-buureysi metelaya dhammaan mujtamaca dadku uu ka kooban yahay oo la dhiirri geliyo (Lijphart, 1977; Andeweg, 2000).

Dowladaha ku dhaqma mabaadii'da hannaanka awood-qeybsiga waxa ay siiyaan dadka laga badan yahay xorriyad hoose oo ballaaran. Hannaanka konsosiyayshan-ka waxa uu dadka laga badan yahay siiyaa matalaad ama xilal dowladda ah xitaa haddii aysan lahayn deegaan ay ku badan yihiin.

Soomaalidu waa ay ku dhaqantay hannaanka konsosiyayshan-ka ama awood-qeybsiga. Hab-beeleedka 4.5, ee awood qaybsigu, waxa uu ka

dhashay shir ay yeesheen kooxda dalladda ah ee Golaha Badbaadada Qaran loona yaqanno Kooxda Soodare. Hannaankani waxa uu matalaad is-le'eg siiyaa afar beelaha Soomaalida ka mid ah oo kala ah Daarood, Digil iyo Mirifle, Dir iyo Hawiye, iyada oo beelaha aan afartan ahayn isku darkooda loo qoondeeyey kala bar inta mid ka mid ah beelaha kale ay heleen.

Hab-qaybsiga 4.5 wuxuu ku cad yahay Baarlamaanka Soomaaliya oo ka kooban 275 kursi, halkaas oo afarta beelood oo waaweyn mid kasta loo qoondeeyey 61 kursi, halka 31 kursi oo hartayna loo kala qoondeeyey beelaha 'yar-yar'.

Hannaanka 4.5 waxaa si xoog leh u difaaca aqoon-yahanka iyo siyaasiyiinta ka soo jeeda beelaha ay dowladihii hore ee siyaasiyiinta beelaha Daarood iyo Hawiye ee talada dalka heyn jiray ay ka sed-bursan jireen. Markii Ra'iisul Wasaarihii hore Maxamed Cabdullaahi Faramaajo uu dhalleeceeyey isticmaalka habka 4.5, waxaa si cad eedayn ugu jeediyey xildhibaannada Digil iyo Mirifle iyo kuwa beesha 5-aad. Waxgarad Soomaaliyeed oo ay ka mid yihiin Dr. Maxamed Xaaji Mukhtaar iyo Sheekh Cumar Faaruuq ayaa iyaguna ku dooday in farsamada 4.5 ay ahayd tallaabo xal ah oo Soomaaliya ku soo korodhay, in kasta oo ay tahay in loo arko farsamo ku meel gaar ah, iyada oo cod si xalaal ah oo xor ku dhacay uu ugu danbayn keeni doono nidaam maamul oo waari kara (Mukhtar, 2007).

Dadka kasoo horjeeda hannaanka awood-qeybsiga iyo habka 4.5 waxay si isku mid ah u tilmaamaan in nidaamkani uu sii xoojinayo kala qaybsanaantii bulshada ku dhex jirtey isaga oo sharciyaynaya (Eno & Eno, 2009; Samatar, 2007). Weliba, waxa ay ku doodaan oo kale is-matalaad aan isku duubni wadan iyo hoggaan dhab ah inay tahay arrin aan macno lahayn. Hannaanka awood-qeybsiga waxa uu ka ambaqaadayaa in dadka wakiilka laga yahay ay leeyihiin ajanda ka dhexeeya oo hogaamiyayaalkoodu ay cabiri karaan. Taa darteed ayaa xuquuqaha qaar wadar-ahaan loo siiyey (collective or group rights) ee aan qof ahaan loo siin. Tusaale, dalka Lubnaan waxaa jira awood-qeybsi ku salaysan diimaha kala duwan. Qolo kasta waxay leedahay wax lagu heshiiyey. Dad kalana waxay ku doodeen in habka awood-qaybsiga 4.5 uusan-ba ahayn mid si xaq ah cid kasta ay matalaad ugu heli karto, ayna tahay in hab-raaca laga badelo 4.5, loona badelo 5 iyada oo beelaha laga badan yahay matalaad ballaaran laga siinayo siyaasadda waddanka (Golayaashii wasiirrada ay la dhisay intii uu Madaxweyne Xasan Sheekh talada hayey waxaa lagu saleeyey 5). Haweenka Soomaaliyeed, kuwaasoo badanaa bannaanka ka jooga siyaasadda qabiilka ku salaysan, waxaa loo qoondeeyey saami ah 30% kuraasta baarlamaanka, inkastoo ay ugu damnbeyntii ka heleen 13% oo kaliya (Garowe Accord Political Agreement, 2012).

Waxaaba lagu doodi karaa in habka 4.5 uu madaxda siyaasadda siiyey qiil ay uga baaqsadaan in ay hirgeliyaan siyaasad ku salaysan muwaadinnimo, waayo qaabka hadda siyaasaddu ku socoto siyaasiyiinta ayaa faa'iido ku qaba. Dhammaan dadka xilalka qabanaya looma fiiriyo mudnaan, karti iyo hufnaan ee waxaa lagu badeley matalaad iyo beel hebel meesha ha iska dhex aragto. Weliba, in kasta oo tiro is-le'eg oo xildhibaanno ah ay afarta beelood ku leeyihiin baarlamaanka, haddana marka la eego sida wax ku socdeen, siyaasiyiinta Hawiye iyo kuwa Daarood ayaa majaraha u hayey siyaasadda Soomaaliya iyada oo hoggaanka labadan beelood ay hayeen tobankii sano oo la soo dhaafay xilalka madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaraha.

Dadka taageersan hannaanka awood-qeybsiga ama awoodda beelaha lagu qaybsanayo waxay ku doodaan in hannaankani uu wax weyn u taray Soomaaliya. Waxaa si baahsan loo dhiiri geliyey in ka qaybgal siyaasadeed la siiyo dadka laga badan yahay iyo kuwa fursadaha aan haysan ama horay loo siin. Haweenka iyo dhallinyarada waxay iyaguna wadaan dalabkooda ah in loo oggolaado in ay matalaad ama kaalin ka helaan siyaasadda qaranka oo inta badan ay ku amar ku taagleeyaan raggu. Matalaad ku salaysan tirada dadka wakiilka laga yahay (proportional representation) iyo in dadka hagrashada tirsanaya in loo sed-buriyo (positive discriminiation) waxay keeni karaan in ay korodho kalsoonida lagu qabo dowladda.

Hannaanka awood-qeybsiga kaligiis uma badna inuu keeno in si aad ah loogu dhowaado dimuqraadiyad dhaafsiisan sida xaal hadda yahay iyo muwaadinnimo

loo siman yahay (inclusive citizenship). Si kale haddii loo dhigo, nidaam kasta oo xaqa qofka muwaadinka ah ka sarraysiiya xaqa ama mudnaan kooxeed ma noqon karo mid waara. Nidamka 4.5-ka ee Soomaaliyana beeluhu ma simana, muwaadiniintuna ma sinna. Tusaale, dhanka beelaha waxaa muuqata inaan loo oggoleyn in xilalka qaar ay qabtaan shaqsiyaad ka yimid beelaha laga sad-bursan jiray. Dhanka muwaadiniintana waxaa hannaanka hadda jira ka faa'iidaysta odoyaasha dhaqanka iyo siyaasiyiinta. Qofka caadiga ah ee Soomaaliga ah wax talo ah kuma laha mashruuca dowladda ee socda.

### Hannaanka Baahinta Xukunka (Devolution)

G. Shabbir Cheema iyo Dennis A. Rondinelli waxay ku qeexaan hannaankan inuu yahay "wareejinta awoodda, masuuliyad iyo hantida ay dowladda dhexe ku wareejiso dowladaha gobollada iyo degmooyinka" (Cheema and Rondinelli, 2007). Rondinelli waxa uu ku sheegay in ay tahay habka ugu sarreeya ee awoodda ay dowlad dhexe u baahiso (Rondinelli, 1980). Dowladda dhexe waxaa kale oo lamahuraan u ah inay siiso dowladaha ka hooseeya ee ay samaysay awood, masuuliyad iyo hanti ama khayraad si ay go'aan u qaadan kaan una fulin karaan (Rondinelli, 1980)..

Taariikhda dhow, Boqortooyada Ingiriiska ayaa noqon karta tusaalaha ugu habboon ee hannaankan baahinta xukunka (devolution) hirgelisay. Dowladda dhexe ee London waxa ay awoodda u gudbisay ama ku wareejisay baarlamaanka Scotish-ka iyo golayaasha Wales iyo Woqooyiga Ireland. Hannaanka baahinta xukunku waxa uu awoodda ku wareejiyaa maamullo la yaqaan, kuwaas oo idilkood ku midaysan dowlad dhexe oo madax-bannaan. Inkasta oo wadahadal arrintaas lagu gaaro, haddana hannaankani waa mid dowladda dhexe ay kuwa gobollada iyo degmooyinka awoodaha iyadu siiso ama ku baahiso.

Hannaankan waxaa badanaa lagu dhalliilaa inay ka dhalato maamullo is-dulsaaran. Inta badan, hababka maamulku baahsan yahay, awooddu waa wadaag (Parker, 1995; Rodden, 2004). Waxayna u dhaxaysaa dowladda dhexe iyo kuwa hoose oo darajooyin ah. Sida uu tilmaamay Jonathan Rodden, "markii baahinta xukunka (decentralization) micnaheedu yahay oo kaliya in maamullo lagu kordhiyo kuwii jirey iyo in lasii fidiyo meelaha ay ka jirto mas'uuliyad-wadareedku, waxay sahlaysaa eedaha in la isku riix-riixo, guulahana la wada sheegto. Taasina waxay meesha ka saaraysa isla xisaabtanka iyo in-mas'uuliyadaha cidda lihi ay qaadato. Kaba darane, dalalka awalba tabcaanka la ahaa musuqmaasuqa, hanaanka baahinta xukunka (decentralization-) waxa uu horseedi karaa in kooxo danley ah ay maamulladaas is dul-saaran si talax tag ah ugu danaystaan (competative rent-seeking) iyo in qaababka laaluush lagu bixiyo iyo sida loo qaataba ay baahdo (overgrazing of the bribe base)" (Rodden, 2004, p. 494).

Qodobka 86-aad ee dastuurka Soomaaliya ee 1960-kii ee ciwaankiisu yahay Baahinta Maamulka (Administrative Decentralization), waxa uu dhigayaa in "markii ay suurto gal tahay in hawsha maamulka la baahiyo, ayna qabtaan maamulada hoose ee dowladda iyo wakaaladaha dowladda (public bodies)" (Somali Constitution, 1960). Isaga oo cabbiraya mowqifka Xisbiga Hiil-Qaran, Cabdirisaaq Xaaji Xuseen, Ra'iisul Wasaarihii hore ee Soomaaliya (1964 to 1967) waxa uu qoray:

> Hannaanka dowlad dhexe oo awood midaysan iyo xukun wadaag leh, damaanadna qaadaysa madax-banaanida gobol iyo mid degmo, ayaa uga habboon, aad ugu habboon Jamhuuriyadda saddexaad ee Soomaaliya. Hannaanka dowlad dhexe oo midaysan oo baahisa xukunka waxa uu sahlayaa ma ahan oo kaliya in uu tayeeyo maamullada gobollada iyo kuwa degmooyinka ee kaas ayaa la kari karaa oo kharash ahaan laga bixi karaa (cost-effective). Inkasta oo ay tahay madax-bannaanida gobolka iyo midka degmada in dastuurku uu damaanad qaado; fulinta arrintaasi waa in ay ku xirnaataa awoodda gobol kasta uu u leeyahay in uu fuliyo shaqooyinkaas, kana soo dhalaalo masuuliyadahaas. Markii la hubiyo in gobol uu awood u leeyahay in uu masuuliyadahaas guto, wareejinta xilkaas waa in sida dastuurku qabo loo qeexaa, loona fuliyaa (Xuseen, 2011).

Cali C/raxmaan Xirsi waxa uu leeyahay khalad ayaa laga fahmay in ay Soomaaliya yeelato dowlad dhexe, waxaana mararka qaar lala simaa dowlad keli-talis ah oo military uu xukumayo. Diidmada la diidayo in awoodda maamulka dalka meel la isugu geeyo, waxa uu leeyahay, daruuri kama dhigayso in federaal la noqdo, "Soomaali badan oo aan fahamsanayn macnaha dhabta ah iyo waxa ka dhalanaya dowlad

federaali ah ayaa ereygan siyaasadeed ee federaal u isticmaalaya si ka fiirsi la'aan ah, iyaga oo ula jeeda oo kaliya habka baahinta xukunka (decentralization)" (Xirsi, 2004).

Baahinta xukunka ama dowladda dhexe oo masuuliyadaha qaar ku wareejisaa dowladaha gobollada iyo kuwa hoose waa wax marar badan dhaca. Laakiin, madax-bannaanida iyo taladu waxay taal dowladda dhexe. Dalalka isticmaala nidaamka ay dowlad-dhexe ka taliso ayaa weli ah kuwa ugu badan ee adduunka ka jira, iyada oo in ka badan 75 boqolkiiba ay dalalka adduunku ku dhaqmaan habkaas dowladda dhexe. Inta badan dalalka dimuqraadiga ah waxa ay ku dhaqmaan nidaamka ay maamulka gacanta ku hayso dowladda dhexe, isla-markaasna lagu baahiyo gobollada iyo degmooyinka. Marka in dal uu dowlad dhexe yeesho macnaheedu ma aha in lala mid dhigo kali-talis iyo xukun isku koobid.

Baahinta Xukunka (devolution) fikrad ahaan waa suurto gal in marmar uu madax-bannaani u fududeeyo maamulada hoose iyo hay'adaha madax-bannaan. Scotland tusaale ahaan, waxaa awood badan siiyey dowladda dhexe ee Boqortooyada Ingiriiska, madax-bannaanida ay Scotland ka haysato dowladda dhexe ee Ingiriiska ayaa aad uga badan madax-bannaanida ay ka haystaan gobollada xubnaha ka ah federaalka Itoobiya.

**Gunaanad**

Cidna iskuma khilaafsana in baahinta xukunku ay lagama maarmaan u tahay Soomaaliya si dib loogu yagleelo maamul dowli ah oo Soomaali oo dhammi ku kalsoon tahay. Qaabka uu noqonayo nidaamkaas ama hannaanka loo baahinayo weli Soomaalidu dhexdeeda iskuma raacin. Sida rasmiga ah ama ku cad Dastuurka Qabyada ah, Soomaaliya waa dal federaal ah. Taas macnaheedu ma aha in dooddii mawduucan la xiriirtey la soo afjaray.

Ma jiro hannaan maamul oo xal kama dambays ah u haya dhammaan culaysyada maamul ee Soomaaliya hor yaalla. Duruus waa laga qaadan karaa dalalka kale ee colaadaha kasoo kabanaya si dib loogu dhiso dowladda, inkastoo xaaladda Soomaaliya ay tahay mid iyada ku gaar ah. Xalka waari kara wuxuu noqonayaa mid u gaar ah Soomaalida oo duruufaheeda lagu jaangooyay. Culasyka ugu weyn waxa uu ka imaanayaa sida la isugu dheelli-tiro rabitaanada iska hor-imaanaya ee Soomaaliya ka jira. Dadka Soomaaliyeed waa ay ku kala aragti duwan yihiin arrinka la xiriira baahinta xukunka iyo nooca uu noqonayo.

Qoraalkani waxa uu soo bandhigay ujeeddooyinka ay Soomaali badan u doonayaan in la baahiyo xukunka iyo sababaha ay dalalka shisheeyaha ahi u rabaan arrinkan. Sidoo kale, warbixintu si dul-mar guud ah waxay u soo bandhigtay afar hab oo lagu gaari karo baahinta xukunka. Waxay kaloo daraasaddu isku dayday inay si kooban u muujiso waxtarka iyo waxyeellooyinka uu wato mid kasta oo ka mid ah hannaan maamuleedyada. Wakhtigii ay Soomaalidu sameyn lahaayeen dood iyo wadatashi dhab ah oo ku saabsan baahinta xukunka waa la gaaray. Daraasaddan waxaa loogu talagalay in ay doodaa wax ku biiriso.

Qoraalkaani waa taxane waraaqo-cilmiyeed ah oo kasoo baxaya Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, wuxuuna ku saabsan yahay mowduuca baahinta xukunka (decentralization). Waxay ujeeddadu tahay inay uu billaabato dood qaran ah oo dhab ah iyo inay fikrad ku kordhiso dadka ay taladu ka go'do. Machadku waxa uu sii wadayaa inuu arrintan kasoo saaro faahfaahinno isagoo la tashi ballaaran la sameyn doona shacabka Soomaaliyeed.

## References

Adam, H. (1994). "Somalia: Federalism and Self-Determination." In *Conflict and Peace in the Horn of Africa: Federalism and Its Alternatives,* ed. P. Woodward and M. Forsyth. Aldershot: Dartmouth.

Andewag, R. B. (2000). "Consociational Democracy." *Annual Review of Political Science* 3:509-536.

Cabral, L. (2011). *Decentralization in Africa: Scope, Motivations and Impact on Service Delivery and Poverty.* Working Paper 020. Brighton, Sussex: Overseas Development Institute.

Cheema, G. S. & Rondinelli, D. A. eds. (2007). *Decentralizing Governance: Emerging Concepts and Practices.* Washington, DC: Brookings Institute.

Dowden, Richard. (2011). "Don't force statehood on Somalia." African Arguments. http://africanarguments.org/2011/10/20/don't-force-statehood-on-somalia-by-richard-dowden/ (accessed January 26, 2014).

Elazar, Daniel J. (1994). *Federal systems of the world a handbook of federal, confederal and autonomy arrangements*. London: Longman Current Affairs.

Eno, M. A. & Eno, O. A. (2009). "Intellectualism amid ethnocentrism: Mukhtar and the 4.5 factor." *Bildhaan* 9:137-145.

Golove, D. M. (2003). "The new confederalism: treaty delegations of legislative, executive, and judicial authority." *Stanford Law Review* 55(5):1697-1748.

Hersi, A. (2004). "Democratic Devolution of Powers in Somalia: Administrative Decentralization or Federalism for Self-Destruction." Accessed 25 January 2014. http://www.somaliaonline.com/community/showthread.php/37273-Administrative-Decentralization-or-Federalism-for-Self-Destruction

Hussein, A. (2011). "The Future Constitutional Structure of the Somali Republic: Federal or Decentralized Unitary State?" Accessed 25 January 2014. http://www.hiiraan.com/op2/2011/apr/the_future_constitutional_structure_of_the_somali_republic_federal_or_decentralized_unitary_state.aspx

Lewis, I.M. & Mayall, J. (1995). *A Menu of Options: A Study of Decentralised Political Structures for Somalia*. London School of Economics/EC Somalia Unit.

Lijphart, A. (1977). *Democracy in Plural Societies: Comparative Explanation*. New Haven: Yale University Press.

Lister, F. L. (1996). *European Union, the United Nations, and the Revival of Confederal Governance.* Westport. CT: Greenwood Press.

Mukhtar, M. (2007). "Somali Reconciliation Conferences: The Unbeaten Track." In *Somalia at the Crossroads: Challenges and Perspectives in Reconstituting a Failed State*, ed. A. A. Osman & I. K. Souaré. London: Adonis & Abbey Publishers.

Mukhtar, M. (1989). "The Emergence and Role of Political Parties in the Inter-River Region of Somalia from 1947 to 1960." *Ufahamu* 17(2):157-163.

Parker, A. (1995). *Decentralization: The Way Forward for Rural Development?* Policy Research Working Paper 1475. Washington, DC: World Bank.

Riker, W. H. (1964). *Federalism: Origin and operation significance.* Boston: Little, Brown and Company.

Rodden, J. (2004). 'Comparative Federalism and Decentralization: On Meanings and Measurement.' *Comparative Politics* 36(4):481-500.

Rondelli, D. (1980). 'Government Decentralization in Comparative Perspective: Theory and Practice in Developing Countries,' *International Review of Administrative Science*.

Samatar, A. (2007). 'The Porcupine Dilemma: Governance and Transition in Somalia.' *Bildhaan*, 7:39-90.

Schuk, P. H. (2006). "Federalism." *Faculty Scholarship Series*. Paper 1672. New Haven, CT: Yale Law School Faculty Scholarship.

Waldo, M. (2010). "Federalism in Somalia: Birth of Puntland State and the Lessons Learned." Accessed 25 January 2014. http://horseedmedia.net/2010/10/09/federalism-somalia-birth-puntland-state-lessons-learned

Watts, R. (1996). *Comparing Federal Systems* in the 1990s. Kingston, Ontario: Institute of Intergovernmental Relations, Queens University Press.

Wheare, K. C. (1964). *Federal Government*. Oxford: Oxford University Press.

The Heritage Institute For Policy Studies